

Ardayda “ELL” ee gadaal ka yimaada

Kuboorinta Iyo fursada

Diraasad balaadhan oo lagu sameeyey qiyaasta ardayda Boston ee dugsiga ka hadha waxay soo saartay in Barteyaalka Af Ingiriisiga (English Language Learners -ELL) ee marka ugu horaysa soo gala dugsi sare ee DDB ay halis dheeraad ah ugu jiraan inay hadhaadi noqdaan.

Agaaimaha Guud Carol R. Johnson talaabada ay qaaday ee la dhaho “Qalinjebinta Qof Walba” (Graduation for All) waxa ku jira istaratijiyado liishaamaya kahortaga iyo ka badbaadinta hadhaadinimada, uu ku jiro Akademiga Newcomers si loo xaqiijiyo aflaxaada ardayda cusub ee soogalootinga ah.

Barteyaalka Af Ingiriisiga ee Dugsiyada Dadweynaha Boston

In ka badan 24,000 ardayda DDB (ee ku dhow 43% wadarta), af Ingiriisigu maaha afkooda hooyo.

Waxa ku jira ardaydan:


- Ilaa 10,000 oo karti wacan u leh af Ingiriisiga
- Ilaa 11,000 oo Karti Ingiriisi Kooban (Limited English Proficient – LEP) ama ah Barteyaal Af Ingiriisi (ELL)
- Ilaa 3,000 oo hore u ahaa Barteyaal Af Ingiriisi Kooban (Former Limited English Proficient – FLEP)
- Ardayda Barteyaal Af Ingiriisiga (ELL) oo dhambi waa u qalmaan taageero xaga afka Ingiriisiga waxana ku caawinaya macalimiin khibrad weyn xxxx u leh Ingiriisiga sida Luqad Labaad ah (ESL).

Ardayda DDB waxay ka kala yimaadeen in ka badan 40 dalal kala duwan ee aduunka.

www.bostonpublicschools.org/ELL

Newcomers Academy Akademiga Ardayda Cusub

100 Maxwell Street
Dorchester, MA 02124
telefanka 617-635-7993
fax 617-635-7990
newcomers@boston.k12.ma.us
Nydia O. Méndez, Agaasime



MAGAALAWEYNTA BOSTON

Thomas M. Menino, Duqa Magaalada

GUDIGA DUGSIYADA BOSTON

Rev. Gregory G. Groover Sr., Gudoomiye
Marchelle Raynor, Gudoomiye Ku-xigeen
Helen Dájer ▪ Alfreda J. Harris
Claudio Martinez ▪ Michael O'Neill
Elizabeth G. Reilinger

DUGSIYADA DADWEYNAHA BOSTON

Carol R. Johnson, Agaasimaha Guud
www.bostonpublicschools.org
617-635-9000

NIDAAMKA TAKOOR LA'AANTA

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxayan sina ugu takoorin barnaamijiyadooda, hawlhooda, saldhigyadooda, iyo fursadaha shaqa-siinta iyo wabarashada toona wax ku salaysan jinsiyadda, midabka, da'da, naafada, lab iyo dhediga, diinta, asalka umadeed, ama dhaqanka balwada himadda, umana dulqaataan nooc kasta oo takoor ah, hanjabaad, baqdin gelin, is-khasab iyo/ama wax haddidaad ah oo wax u dhimi kara sharafta cid kale iyadoo faragelinaysa inay wax bartaan ama shaqaystaan.



Akademiga Ardayda Cusub

Newcomers Academy



**Dugsiyada Dadweynaha Boston
waa barnaamij ay ugu diyaarinayaan
Barteyaal Af Ingiriisiga**



Ardayda

Akademiga Ardayda Cusub (Newcomers Academy) wuxu u adeegayaa ilaa 250 ardayda Boston ee ah:

- Inta da'doodu u dhaxayso 14-18;
- Kuwa soo galay dalka Maraykanka xiliga sanad dugsiyeedka;
- Kuwa kartidooda af Ingiriisigu hoosayso;
- Kuwa leh xirfado tacliim hoose xaga afkooda hooyo (3 sano ama in ka badan dibudhacsan); iyo/ ama
- Kuwa hakad ku dhacay xaga waxbarashada rasmiga ah markay dalkoodii joogeen.

Himilooyinka

- In la siiyo waxbarasho tayo sare leh
- In loo dedejiyo hanashada af Ingiriisiga
- In loo horumariyo ubucda ereybixinta tacliimeed iyo xirfadaha heerka fekerka sareeya
- In lagu dhiiri geliyo horumarinta xirfadaha dhaqanka iyo tacliinta ay ardaydu u baahan doonaan markay gelayaan dugsiyada sare ee degmada
- In loo dhiso dhidibka tacliimeed ee mudada fog iyo aflaxaada hidda-dhaqmeedka
- In loogu adeego sida rug wabarasho ee waxqabadyada ugu wanaagsan xaga waxbarashada dugsi sare ee barteyaalka af Ingiriisiga hakad kaga dhacay ama ka hadhay waxbarashada rasmiga ah.



Qorida dugsi

Ardayda idil ee ku cusub Dugsiyada Dadweynaha Boston waa inay booqdaan Xarunta Waxtarmada Qoyska iyadoo wata waraagaha haboon siday u bilaabaan qaabka dii-waangelinta. Barteyaalka Af Ingiriisig waxa lagu gartaa sahaminta afka hooyo iyo imtixaano lagaga qaado Xarunta Qiimaynta iyo Latalinta Ardayda Cusub (Newcomer Assessment and Counseling Center). Ardayda daboolaha shuruudaha Akademiga Ardayda Cusub (Newcomers Academy) waxa looga warami doonaa barnaamijka. Ardayda oo dhami waxay buuxin doonaan arji xulasho siday u doortaan isla markaas dugsi sare ee dibloome laga bixiyo.

www.bostonpublicschools.org/register

Ardaydu waxay dhigan karaan Akademiga Ardayda Cusub (Newcomers Academy) hal simistar ama ilaa laba sano dugsiyeed, taasoo ku xidhan baahida tacliimeed, intaan lagu qorin dugsi sare ee dibloome laga qaato. Shaqaalaha Akademiga Ardayda Cusub waxay sii wadi doonaan kormeerka horukaca ardayda kadib markay ka baxaan barnaamijka.

Shaqaalaha

Ardayda iyo qoysaska waxa taageero siiya shaqaale, macalimiin, maamuleyaal, lataliyeyaal khibrado u leh afaf badan iyo dhaqano kala duwan, iyo oo kale hanuuniyeyaal, iyo layliyo macalimiin ka yimaada kuliyaadaha iyo jaamicadaha. Qiyaasta cabirka ardayga-macalinku kama badan doono 15-ilaa-1.

Danwadaagaha

- Jaamicada Massachusetts Boston
- Jaamicada Boston
- Xafiiska Duqa Magaalada ee Reer Bostonka Cusub (New Bostonians)
- Hay'adaha maxaliga ah ee adeega dhaqanka



Tacliimaha & Qiimaynta

Ardayda idil waxay ku foogan yihiin shaqa-koorso adag, ay ku jiraan:

- Ingiriisiga sida Luqad Labaad ah (English as a Second Language – ESL) oo xoogan iyo horumarinta Aqri/Qorida, iyo
- Barida Ingiriisiga Sugan, Xisaab, Saynis, Teknoloji, Duruusta Dhaqanka, Fananka iyo Waxbarashada Jirdhiska.

Ardaydu waxay ka qayb galaan safaro gaaban ee dibadeed iyo adeega bulshada si loo taageero ugudubkooda nololeed ee Boston. Waxabarida waxa la sameeyaa maalin dugsiyeedka, iyaado caawimaad dheeraad ahina jirto maalinta Sabtida iyo kulaylaha.

Horukaca ardayda waxa lagu qiimeeyaa cabiro kala duwan, ay ku jiraan:

- Imtixaanada "MCAS", sida MELA-O iyo MEPA si loo qiimeeyo xirfadaha akhriska, qorida, kuhadalka iyo dhegeysiga;
- Buugagta Xisaabta lagu qoro;
- Shaqooyinka laysu diro ee akhriska iyo qorida;
- Ka qaybgalka adeega bulshada; iyo
- Warbixinta kabixida.

Rugta

Akademiga Newcomers wuxu ku yaalaa rugtii hore ee Dugsiya Dhexe Thompson, 100 Maxwell Street, Dorchester. Laga bilaabo Sebtembar 2009, barnaamijku islameel buu kula jirayaa Dugsiya Sare Boston International, ee ah dugsi ardayda wadanka ku cusubi dibloome ka qaataan. Barnaamijyadu waxay iskaashan doonaan si loogu fidiyo adeegyo ardayda iyo qoysaska, iyo oo kale hawlo dheeraad ah ee dugsiya ka baxsan, sida atleetikada, naadiyada iyo hawlaha dhaqanka.